IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdishoo 15 Abriil 1980 L. 1 R 4

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàı wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 10 ee 17 Diseember 1979, Mideyn LabaBoga Waaxood 468

SHARCI L. 11 ee 5 Abriil 1980 Meel Marin Heshiis » 469
tification

LAW N. 11 on 5th Abriil 1980, Instrument of Re- » 470

SHARCI L. 12 ee 5 Apriil 1980, Meel Marin Heshiis » 471

قانون رقم ١٢ الصادر ٥ أبريل ١٩٨٠ الصندوق العربى يبرم
اتفاقية مع جمهورية الصومال الديمقراطية ٤٧٢

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 50 ee 15 Abril 1980, ku Maamusid Billado Kacaannimo Wadannimo Hawlkarimo Hay'ado kala duwan » 473

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 51 ee 15 Abriil 1980, ku Maamuusid Bilado Waddanimo iyo Hawlkarnimo Jaallayaal u soo halgamay Taakuleynta Gobannimadoonka iyo Jaallayaal sidaacadnimo iyo dadaal dheeraad ah u gutay shaqo Qaran. » 474

XEER MADAXWEYNAHA L. 52 ee 5 Abriil 1980, Lacag cusub oo Xaashi ah uu soo saari doono Bankiga Dhexe ee Soomaaliya » 476

DECREE MADAXWEYNAHA JDS, L. 52 5th April 1980, Determination of the quantities of a Shillings. » 478

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 53 ee 26 Febraayo 1980, Abuurid Xafiis Hanti Dhowr » 480

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 54 ee 26 Febraayo. 1980 Gunnada Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magalada Xamar » 482

## QAYBTA SADEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN *OGEEYSIIS* IYO *WIXII LA* MID *AH*

XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA ee 27 Jenaayo 483

## *QAYBTA KOOWAAD*

SHARCI L. 10 ee 17 Diseember 1979 Mideyn Labo Waaxood.

## *MADAXWEYNAHA J. D. S*

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82aad xubintiisa 14aad — ee Dastuurka J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xeer Lamb. 30 ee 4tii Maarso 1977 oo dhisмaha Qaabka Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Inay tahay lagama maarmaan in la mideeyo labdii Waaxood oo kala ahaa Waaxda Buugeynta iyo Baadhista iyo Maaxda Tarumada iyo Wargeysyada.

### WUXUU XEERAYAA

### QODOBKA 1AAD

Waxaa la abuuray Waaxda Buugeynta, Wargeysyada, Baadhista iyo Tarjumadda ee Xarunta Madaxtooyada J. D. S.

### QODOBKA 2AAD

Waxaa la baabi'yey Waaxood ee horey u jerey oo kala ahaa

1) Waaxda Buugeynta iyo Baadhista;

2) Waaxda Tarjumada iyo Wargeysyada

### QODOBKA 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan geleyaa markuu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 17 Diseember 1979

*MADAXWEYNAHA J. D. S*

SHARCI L. 11 ee 5 Abriil 1980 Meel marin Heshiis

**MADAXWEYNAHA J. D. S**

ISAGOO ARKAY : Qod 72iid Xubintiisa 1aad iyo 82aad xubintiisa 14aad ee Dasttuurka J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Oggolaasha Golaha Shacbiga ee Heshiiska Dhexmaray Dawladda Soomaaliyeed iyo Ururka Dawladaha Saliida Soo Saara (OPEC) ee 15kii Bisha Maarso 1980

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Dawladaha Saliida soo Saaro (OPEC) Xaruntooda tahay VIENNA (AUSTRIA) oo lagu kala saxiixday Magaaladda Muqdisho taariikhda 14 Janaayo 1980 oo ku saabsan Amaah $ 5.5 miliyuun doolar oo loogu talagaoo lay inloo fidiyo Mashruuca Sonkorta Juba; waa la meel mariyay.

QODOBKA 2AAD

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa J. D. S. astiin sharci ah, wxuuna dhaqan gelayii markuu Madaxweynaha J. D. S.; wxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Abriil 1980

(JAALLE MADAXWEYNAHA SIYAAD BARRE)

MADAXWEYNAHA J. D. S.

LAW No. 11 on 5th April 1980 Instrument of Retification :

HAVING SEEN : Article 72 paragraph 1, and Article 82 paragraph 14 of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

TAMING NOT : The approval of the people's assembly of the Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the OPEC Special Fund of 15th March 1980.

Hereby promulgates the following law :

## ARTICLE I

The Loan Agreement between the Govorment of the Somali Democratic Republic and the OPEC Special Fund whose seat is in Vianno Austria, which was concluded in the city of Mogadishu on 14th January 1980 and which concerna Loan of $ 5.5 Million Dollars given to the Jubba Sugar Project; is hereby ratified.

## ARTICLE II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Republic and shall enter into force upon signature by the President of the Somali Democratic Republic; and shall be pubblished in the official Bulletin

Mogadishu, 5th April 1980

(MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE)

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 12 ee 5 Abriil 1980 Meel marin heshiis

ISAGOO ARKAY : Qod. 67aad Xubintiisa 5aad iyo Qodobka 82aad xubintiisa 4aad ee Dastuurka J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriydda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Dalka Keweyt ee 9kii Jannaayo 1980

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Carbeed ee Horumrinta Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Dalka Kuweyt oo lagu kala saxeexday Magaalada Muqdisho taariikh. 9 Jannaayo 1980 oo ku saabsan amaah lacageed oo lagu maalgelinaayo Mashruuca Cjribtirka Gosha Gendigga waa la meel mariyay.

QODOBKA 2AAD

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa J. D. S. astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Abriil 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE

قانون رقم ١٢ الصادر ٥ أبريل ٨٠ ١٩ الصندوق العربى يبرم اتفاقية مع جمهورية الصومال الديمقراطية

العشرين دقيقة ما لم ير رئيس الجلسة خلاف ذلك .

## وثيقة التصديق

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطلاع على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة والمادة ٨٢ الفقرة الرابعة

من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية

وبعد الاطلاع على موافقة مجلس الشعب لاتفاقية القرض لمشروع مكافحة مرض النوم الحيوانى المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى

الموقع عليها فى ٩ يناير ١٩٨٠م.

يصدر المرسوم التالى :

### المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع مكافحة مرض النوم الحيوانى الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ٩ يناير ١٩٨٠م.

### المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية ويطبق هذا القانون حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية وستنشر فى الجريدة الرسمية للدولة.

مقديشوه، فى ٥ ابريل ١٩٨٠م.

اللواء محمد سياد برى
رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

## *QAYBTA LABAAD*

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 15 Abriil 80 kuMaamuusid Billado Kacaanimo Waddannimo, Hawlkarnimo Hay'ado kala duwan

Madaxweynaha J.D.S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY : Sharciga Lambar 1 ee 1dii Luuliyo 1976;

MARKUU ARKAY : Sharciga lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY : Soo jeedinta Guddigga ka socday Golaha Dhexe ee XHKS; oo kormeer hawleed ku soo maray Gobollada Bakool, Gedo iyo Bay, in Degmada Ceel-Waaq, Degmada Buur-hakaba, Jameecadda Misra, Jameecadda Bombeegay lagu maamuso billado Kacaannimo, Wadannimo iyo Hawlkarnimo.

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in Hay'adahaa la gudoonsiiyo aqoonsiga ay Kacaankooda ka mudan yihiin loogana reebo raad wax ku ool ah, dhaxal gal ah, taariikhi ah.

MARKUU DAGEYSTEY : Talada Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaadda ee Madaxtooyada J. D. S.

### WUXUU GUDOOMIYEY

### QODOB KELIYA

Waxaa lagu maamusay Hay'adaha soo socda Billadda mid kasta horteeda ku qoran :

1) Degmada Buur Hakaba Billad Qalin ah oo Kacaannimo

2) Jameecadda Misra : Billad Maar ah oo Kacaannimo

3) Jameecadda Bombeegay Billad Maar ah oo Waddannimo

4) DegmadaCeel-waaq Billad Maar ah oo Hawlkarnimo

Muudisho 15 Abriil 1980

*MADAXWEYNAHA* **J. D. S.**
*S/Gaas* ***MAXAMED SIYAAD BARRE)***

XEER MADAXWEYNAHA L. 51 ee 15 Abriil 1980 Kumaamusid Billado Waddaninimo iyo Halkarnimo Jaallayaal u soo halgamay Taakuleynta Gobannimadoonka iyo Jaallayaal si daacadnimo iyo dadaal dheeraad ah u gutay shaqo Qaran.

MADAXWaaYNAHA J.S.D.

MARKUU ARKAY : Dastuurka JDS, Qodobka 82;

MARKUU ARKAY : Sharciyada L. 1 ee 1dii Luuliyo 1967 iyo L. 18 ee 1. 7. 1976;

MARKUU ARKAY : Sharciga L. 65 ee 19kii Oktoobar 1970, (Habka Abaalmarinta Qaranka);

MARKUU TIXGELIYEY : In Jaallayaasha Abshir Caynshe Warsame iyo Jaalle Maxamuud Cali Maad Guuleed ay soo halgameen Xornimadoonkii iyo Taakuleyntii Gobannimadoonka, iyadoo kan hore uu naftiisa u huray kuna qor baxay dagaal uu isaga abbaanduule ka ahaa, kan dambena isagoo ku tilmaaman Abwaanimo salgaar leh. una soo maray halgan dheer Waddanka, waqtigii Xornimadoonka iyo inta Kacaankani dhashayba;

MARKUU TIXGELIYEY : In Jaallayaasha Maxamed Muuddey Xaaji Abiikar oo ah (Airport Marshal), kana tirsan Shaqaalaha Waaxda Dhuulista iyo Hawada ee Wasaaradda Gaadiidka iyo L/Xiddigle Bol. Maxamed Faarax Yuusuf oo ah Makaaniga Koowaad ee Wasaaradda Gaadiidka Booliska Xamar isla markaana ahaa Sarkaalkii soo kashifay kiiskii foosha xumaa ee ka dhacay Furdada Xamar ee joogta ahaanloogu curyaamin jiray dhaqaalaha Dalka, isagoo u bareeray eed culus damcina inuusan ka haybaysaan dadka faraha badan ee sharciga waddanka ku tuntay, ay si daacadnimo, xilkasnimo, hawlkarnimo iyo dadaal dheeraad ah leh u guteen shaqada Qaranka.

MARKUU ARKAY : in ay tahay lagama maarmaan in loo aqoonsado qof kasta kaalinta uu ka qaato daryeelka danaha dalkiisa iyo dadkiisa, raad dhaxal gal ahna looga reebo, lana dareensiiyo naftood hurayaasha waddaniyiinta waddaniyiinta ah, daacadda ah, niyadda saan, Ummadooda

ineyan marna illoobeynin halgankooda xaqa ah, xalaasha ah, taariikhda Dalkoodana ka gela-yaan baalka ay ka mudan yihiin;

MARKUU DHEGEYSTAY : Talada Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaadda ee Madaxtooyada J. D. S.

WUXUU GUDDOOMIYEY

Xeerka soo socda :

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Jaallayaasha hoos ku xusan Billada mid kasta magaciisa ku hor qoran :

1) Jaalle Abshir Caynshe Warsame — Billad Qalin Waddaninimo ah;

2- Jaalle Maxamuud Cali Maad Guuleed — Billad Qalin Waddaninimo ah;

3) Jaalle Maxamed Muuddey Xaaji Abiikar — Billad Maar Hawlkarnimo ah;

4) Jaalle L. Xiddigle Maxamed Faarax Yuusuf — Billad Maar hawl karnimo ah.

Muqidsho, 15 Apriil 1980

*MADAXWEYNAHA J.* D.S.
Jaal*le* MAXA*MED* S*I*YAAD BARRE

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 5 Abriil 1980 Lacag cusub oo xaashi ah, uu soo saari doono Bankiga dhexe ee Soomaaliya.

MADAXTOOYADA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Qodobka 82 Xarafka 14aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MARKUU ARKAY : Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 ee soo baxay 26kii Maarso 1961, loona beddelay Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo 1961, kuna saabsan nidaamka lacagta Soomaaliyeed.

ASAGOO TIXGELINAYA : Baahida loo qabo in dhaqso loo kordhiyo lacagta xaashida ah lana caddeeyo tiradeeda, farsamadeed iyo farshaxankeeda.

ASAGOO TIXGELINAYA : Go'aanka Golaha Wasiirrada, iyo talada uu soo jeediyey Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

QODOBKA 1AAD

Waxaa la oggolaaday in Bankiga Dhexe ee Soomaaliya uu soo saaro :

b) 4.000.000 (afar malyan) xabbo oo ah xaashida 100 (boqolka) Shilin, qiimaheeduna dhan yahay Sh. So. 400.000.000 (afar boqol malyaan) Shilin, una qaybsan afar horimood «series» oo midkiiba yahay 1.000.000 xaashiyood oo isugu xiriira lambar isdabajoog ah oo ka bilawda 000001 ilaa 1.000.000 sitana xarafka «X» oo uu ka dambeeyo Lr. 001 ilaa 004.

t) 25.000.000 (labaatan iyo shan malyan) xabbo oo ah xaashida 20 (labaatanka) Shillin, qiimaheeduna dhan yahay Sh. So. 500,000,000 (shan boqol oo Malyan) shillin, una qaybsan labaatan iyo shan horimood «series» oo midkiiba yahay 1.000.000 xaashiyood, isuguna xiriira lambar isdaba-

joog ah oo ka bilawda 000001 ilaa 1.000.000 sitana xarafka «X» oo uu dambeeyo lambarka 001 ilaa 025.

j) 10.000.000 (toban malyan xabbo oo ah xaashida 10 (tobanka) Shilin, qiimaheeduna dhan yahay Sh. So. 100.000.000 (boqol malyan) Shilin, una qaybsan toban horimood «series» oo midkiiba yahay 1.000.000 xaashiyood, isuguna xiriira lambar isdabajoog ah, oo ka bilawda 000001 ilaa 1.000.000, sitana xarafka «X» uuna ka dambeeyo lambarka 001 ilaa 010.

QODOBKA *2AAD.*

Xaashi — Lacageed 10, 20, iyo100 oo Shilin Soomaaliya ah oo qodobka hore lagu tilmaamey tiradooda waxaa si tifaftiran loogu caddeeyey summadda iyo Farsamadaba Xeerka ka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya ee 6dii Diseembar 1977kii Lr. 74.

QODOBKA 3AAD

Summadaha iyo farsamada lagu xusay Xeerka Qodobka 2aad, laguna tilmaamay, waxaa iskabeddelay oo keliya saxiixyada :

b) Saxiixa Guddoomiyihii hore Jaalle CUMAR AXMED CUMAR, waxaa lagu beddelay saxiixa Jaalle MAXAMUUD JAAMAC AXMED, oo ah Guddoomiyaha BankigaDhexe ee Soomaaliya.

t) Saxiixa lacaghayihii hore Jaalle CALI SHIIKH XUSEEN, waxaa lagu beddelay saxiixa Jaalle MAXAMUUD XAAJI CUMAR ASKAR, oo ah lacaghayaha.

QODOBKA 4AAD

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soo-Soomaaliya.

Muqdisho 5 Abriil 1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaal*le* MAXA*MED* S*I*YAAD BARRE

DECREE N. 52 of PRESIDENT OF SOMALI REP. DEMOCRATIC ON 5th APRIL 1980 Determination of the quantities of a new Issue of Banknotes

HAVING SEEN : Art. 82 Para 14 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN : Art. 5 of the Decree Law No. 2 of March 6th, 1961 converted into Law No. 13 of May 23rd, 1961 on the Monetary Ordinance of Somalia,

CONSIDERING : The necessity of issuing new banknotes, and determining the quantities, its technical feature and artistical design.

HAVING HEARD : The Council of Ministers on the proposal of the Governor of the Central Bank of Somalia.

D E C R E E S

The Central Bank of Somalia is authorized to issue :

a) 4.000.000 (four millions) of 100 (onehundred) notes for a total value of So. Sh. 400.000.000 (four hundred millions Shillings) divided in to four series of 1.000.000 notes each and progressively numered from 000001 to series of 1.000.000 marked by the letter «X» followed by the number 001 up to 004.

b) 25.000.000 (twenty five million) of 20 (Shillings, notes for a total value of Sh. So. 500.000.000 (five hundhed million) Shillings, divided into twenty series of 1.000.000 notes each and progressively numbered from 000001 to 1.000.000, marked by letter «X» followed by the number 001 up to 025.

c) 10.000.000 (ten million) of 10 (ten) Shillings, notes for a total value of Sh. So. 100.000.000 (onehundred million) Shillings, divided into ten series of 1.000.000 notes, each and progressively numbered from 000001 to 1.000.000 marked by the letter «X» followed by the number 001 up to 010.

The 10, 20 and 100 Somali Shillings banknotes referred to in the above article will have the technical and artisticcal features established by the decree of the President of the Supreme Revolutionary Council No. 135 of 11th December 1974.

ART. 3

Only the signature will bechanged as follows, in the artistical and technical features established by the Degree reffered to in the preceeding article :

a) The signature of the former Governor Mr. OMAR AHMED OMAR will substituted with the signature of the Present Governor Mr. MOHAMUD JAMA AHMED.

b) The signature of the former cashier Mr. ALI SHEEKH HUSSEIN will be substituted with signature of the present cashier Mr. MOHAMUD HAJI OMAR ASKER.

ART. 4

This decree will come into force on the date of its publication in Offical Bulletin of the Somali Democratic Republic.
5 April 1980

Mogadishu 5 Abriil 1980

*MAHAMED SIYAD BARRE*
**THE PRESIDENT OF S. REP**

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 53 ee 26 Febraayo 1980, Abuuris Xafiis Hantidhowr.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : 111aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Di-

ISAGOO ARKAY : Xeerka Lr. yahay 46 ee 16. 9. 1979, kaasoo lagu geliyey Dastuurka J. D. Soomaaliya,

ISAGOO ay la noqotay lagama maarmaan Abuuris Xafiis Hanti-dhowr ee hubaalin iyo Kontroollaba ku sameeya Hanti Qaran oo ay u xilsaaran tahay D. Hoose ee Xamar

ISAGOO Garwaaqsaday in uu aad u kordhay Dhaqaalaha D. Hoose ee Xamar oo hadda Miisaaniyaddeedu gaarsiisan tahay Sh. So. 80.000.000 (Siddeetan Malyan) ku dhowaad, in la abuuro Xafiis Hanti-dhowr oo ka mas'uul ah Ilaalinta Maamul xumada, si uu u isticmaalidda, ku takri falidda iyo dayacaadda Hantida D. Hoose ee Muqdisho,

ISAGOO ay ula muuqatay in Xafiiskaas ay ka hawl qabtaa Saddex Xubnood oo aqoontoodu, Daacadnimadoodu iyo Aaminnimadooduba yihiin heer sare,

ISAGOO Tixgeliyey tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho ee la xiriirta dhismo Xafiis Hanti-dhowr ee D. Hoose ee Muqdisho,

WUXUU SOO SAAREY XEERKAN

Qodobka 1aad

DHISMAHA XAFIISKA

Laga Billaabo maalinta Madaxweynuhu saxiixo, waxaa Xeerkan lagu dhisay Xafiis Hantidhowr ee D. Hoose ee Muqdisho, kaasoo xilkiisu noqon doono Ilaalinta Hantida D. Hoose ee Muqdisho, isagoo ka dhowraya Maamul xumo, si xun u isticmaalidda, ku takri falidda, dayacaadda iwm.

QODOBKA 2AAD

MAGACAABIDDA XUBNAHA

Xafiiska Hanti-dhowrka, waxaa loo magacaabay inay ka hawl qabtaan Xubnaha hoos ku qoran:

1) Jaalle Dr. Cali Maxamuud Barkhadle
   Madaxa Xafiiska Hanti-dhowrka.
2) Jaalle Mukhtaar Xasan Cabdi
   Kaaliye Hanti-dhowr
3) Jaalle Maxamed Cumar Yuusuf
   Kaaliye Hanti-dhowr

QODOBKA 3AAD

AWOODDA IYO XUQUUQDA

1) Xafiiskani wuxuu toos u hoos imaanayaa Duqa Magaalada Muqdisho, Xubnaha ka shaqeeyana waxay awood u yeelan doonaan inay baaritaan iyo Kormeerba ku yeeshaan dhammaan Xafiisyada D. Hoose, iyagoo fulinaya ujeeddooyinka ku tilmaaman Yodobka 1aad ee Xeerkan.

QODOBKA *4AAD*

Hadda wixii ka dambeeya xubnaha Xafiiska waxay dawiya ahaan la sinnaan doonaan, kuna xuquuq qaadan doonaan Jagooyinka mid walba ku hor qoran.

1) Madaxa Xafiiska Hanti-dhowrka — Heer Agaasime
2) Kaaliye Madax Hanti-dhowr — Madax Xubin

*QODOBKA 5AAD*

Xeerkan wuxuu ka mid noqon doonaan Sharciga Lr. yahay 28 Biis ee 21. 2. 1976, iyo wax baddellaaddii ka dambeeysay, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee J. D. S.
Muqdisho 26 Febraayo 1980

*MADAXWEYNAHA* J. D. *S.*
*Jaa*lle S. *GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE*

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 54 ee 26 Febraayo 1980 Gunnada Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Xamar.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Qodobbada 8/4, 13—6 iyo 22 ee Sharciga lambar 6, soona baxay 12 Febraayo 1980 (Sharciga Golayaasha Shacbiga ee Degaannda);

MARKUU ARKAY : In ay lagama maarmaan tahay in la xaddido gunnooyinka Xubnaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Xamar;

MARKUU DHEGEYSTAY talada Wasiiradda Maaliyadda;

*WUXUU SOO* **SAARAYAA**

***Xeerka soo socda:***

*QODOBKA 1AAD*

Xubnaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ee Magaalada Muqdisho waxay yeelanayaan, bil waliba, gunnada magacyadooda ku hor qoran :

— DUQA MAGAALADA XAMAR : Gunno Wasiir iyo guri qalabeysan;

— KU XIGAHA DUQA MAGAALADA XAMAR Gunno Wasiir ku xigeen

— KU - XIGEENKA XOGHAYAHA GOLAHA SHACBIGA EE MAGAALADA XAMAR IYO GUDDOMIYE GUDDI HOOSAAD Sh. So. 2.200

— GUDDOOMIYE KU XIGEEN GUDDI HOOSAAD IYO XUBIN GUDDIGA JOOGTADA AH : Sh. So. 1.500

*QODOBKA 2AAD*

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 24. 2. 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 26. Febraayo 1980

*MADAXWEYNAHA J. D. S.*

*S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE*

XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA ee 27 Jenaayo 1980

## *HORDHAC*

Iyadoo la wada ogsoon yahay in Gole Shacbiga kasta uu iska leeyahay Xeer-Hoosaad nidaamiya, loona cuskado fulinta iyo horumarinta hawlihiisa kala duwan, ayaa Xeer Hoosaadkan oo magacsiisu yahay «XEER-HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA» kadib markii aad loo lafaguray, loogana baaraandegay, lana hibiyey inuu waafaqsan yahay Dastuurka, ayaa Golaha Shacbigu si wadajir ah ugu oggolaaday shirkiisii 26. 1. 1980.

Xeer Hoosaadkan oo ka kooban 47 qodob, wuxuu si rasmi ah u dhaqan galay taariikhda kor ku xusan ee Goluhu oggolaaday.

Muqdisho, 27. 1. 1980

*JAALLE ISMAACIIL CALI ABOKOR*
*GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA*

XEER HOOSAADKA GOLAHA SHACBIGA

*XUBINTA 1*

*BILLAABIDDA XILKA XILDHIBAANNIMADA*

*QODOBKA 1AAD*

*(DHAARTA XILDHIBAANNIMADA)*

1) Xildhibaanku inta uusan bilaabin hawshiisa wuxuu Shirguddoomiyaha hortiisa ku marayaa dhaarta soo socota :

«*WAXAAN MAGACA ILAAHAY IYO KAN WADDANKA KU MARAYAA INAAN AMMAANO, KALSOONI IYO HAGAR LA'AAN UGU ADEEGO SHACBIGA SOOMAALIYEED, INAAN FULIYO MABAADI'DA KACAANKA 21KA OKTOOBAR 1969, INAAN DHAWRO DASTUURKA & SHURUUCDA DALKA INAN HIRGELIYO MABAADI'DA HANTIWADAAGGA, INAAN ILAALIYO DANTA GUUD EE SHACBIGA IYO DANAHA QARANKA SOOMAALIYEED, INAAN KARTIDAYDA OO DHAN KU DAAFACO XORRIYADA, MADAXBANAANIDA IYO MIDNIMADA DALKA, INAAN DANTA GUUD KA HORMARIYO DANTEYDA GAAR AHAANEED, INAAN DADKA SOOMAALIYEED KU DHAQO SINNAAN IYO CADDAALAD*».

2) Xildhibaankii diida inuu maro dhaarta kor ku xusan, wuxuu ka dhacayaa xilka Xildhibaannimada Golaha Shacbiga.

*XUBINTA II*

*GUDDIGA JOOGTADA AH*

*QODOBKA 2AAD*

*(DOORASHADA GUDDIGA JOOGTADA AH)*

1) Golaha Shacbigu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya ka dhex doorانayaa Xubnihiisa Guddoomiyaha Golaha iyo laba Guddoomiye.

2) Wuxuu kaloo dooranayaa Xoghayaha iyo tobanka xubnood ee Guddiga Joogtada ah.

3) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeennada Golaha Shacbigu waxa ay noqonayaan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeennada Guddiga Joogtada ah?

4) Xoghayaha Guddiga Joogtada ah waxaa uu noqonayaa Xoghayaha Golaha Shacbiga.

5) Guddoomiyaha Golaha Shacbiga, Guddoomiye ku-xigeennada iyo Xubnaha kale ee Guddiga Joogtada ah waxaa soo sharraxaya Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

6) Guddoomiyaha Golaha, Guddoomiye ku-Xigeennada iyo xubnaha kale ee Guddiga Joogtada ah waxaa lagu dooranayaa hab gacan taag ah oo ku ansaxaya cod hal dheeri ah.

7) Haddii xubin ka mid ah Guddiga Joogtada ah uu xilka ka fariisto, beddelaadiisa waxaa loo marayaa habka ku xusan lambarada 5 iyo 6 ee qodobkan.

## *QODOBKA 3AAD*

## *XILKA, AWOODDA IYO FADHIYADA GUDDIGA JOOGTADA AH*

1) Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu wuxuu qabanayaa xillalka iyo awoodaha ku xusan qoddobbada 76 iyo 78 ee Dastuurka.

2) Guddiga Joogtada ah fadhigiisu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan seddex meelood laba xubnihiisa.

3) Inta uusan Guddiga Joogtada ah Go'aan ka gaarin arrin ansaxinta Golaha Shacbiga u baahan yahay, waxaa loo gudbinayaa Guddiga awoodda u leh.

4) Go'aanada uu gaaro Guddiga joogtada ah inta u dhexeysa Kalfadhiyada, una aahan in Golaha laga ansaxiyo, waxaa loo bandhigayaa Golaha, iyadoo uu jeedinayo xubinta Guddiga ee loo xilsaaro.

5) Ka doodidda iyo cod u qaadidda go'aannada ku xusan lambarka 4aad ee qodobka, Golaha Shacbiga wuxuu u marayaa habka ku tilmaaman qodobbada 37 — 43 ee Xeerkan.

## *QODOBKA 4AAD*

## *XIKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA)*

1) Guddoomiyaha Golaha Shacbiga waa Hoggaamiyaha Golaha, wuxuu hubanti geliyaa dhowrista Xeer-hoosaadka Golaha iyo habsami u socodshada hawlaha Golaha. Wuxuu qeybiyaa hadalka, dhexdhexaadiya doodaha, bandhigaa su'aalaha, dejiyaa nidaamka cod-bixinta, ku dhawaaqaa natiijada codadka, kormeeraa hawlaha Xoghayaha, kormeeraha iyo ku-xigeennada kormeeraha. Wuxuu isugu yeeraa mar kasta oo loo baahdo xubnaha Guddiga Joogtada ah, Guddoomiyayaasha Guddiyada Golaha, sbi looga baaraandego nidaamka iyo kala hormarinta hawlaha Golaha, isagoo ogeysiinaya Dawladda, haddii ay la habboonaato, si ay u soo magacawdo qof uga wakiil ah shirarkaas.

2) Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa, muddada Goluhu kala maqan yahay, mashruucyada sharciyada, warbixinnada iyo codsi kasta oo ka yimaada Xildhibaannada, isagoo wargelinaya Golaha maalinta ugu horreysa ee uu isu yimaado.

## *QODOBKA 5AAD*

## *(GUDOOMIYE KU-XIGEENNADA)*

1) Gudoomiyuhu marka uu maqan yahay ama ay ku timaaddo sabab ka reebaysa gudashada xilkiisa, waxaa hawlihiisa qabanaya Goddoomiye ku-xigeenka 1aad.

2) Guddoomiye ku-xigeennada waxay kaloo qabanayaa hawlihii kale ee Guddoomiyaha ama Guddiga Joogtada ahi u xilsaaraan?

### *QODOBKA 6AAD*

### *(XILKA XOGHAYAHA)*

1) Xoghayuhu, isagoo hawlgelinaya hawlwadeennada Golaha, wuxuu qabanayaa xilalka soo socda :

a) Ogeysiinta Xildhibaanada, waqti ku haboon, taariikhda fadhiyada Golaha iyadoo la raacinayo ajendaha shirarka,

b) Qoridda magacyada Xildhibaanada hadalka weydiista;

t) Akhrista soo jeedinta iyo qoraallada kale;

j) Qoridda go'aannada Golaha;

x) Ku sugidda diiwaanka Xildhibaannada jooga iyo kuwa maqnaada;

Kh Hubinta mashruucyada sharci iyo go'aannada kale ee Goluhu guddoomiyo isagoo saxiixaya.

2) Xoghayaha Golaha shacbiga waa madaxa Maamulka iyo Shaqaalaha Golaha.

3) Xoghayaha waxaa fulinta xilkaas gacan ku siinaya laba kaaliye Xoghaye oo uu Guddiga Joogtada ahi xubnihiisa ka dhex dooranayo.

### *QODOBKA 7AAD*

1) Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa hal kormeere iyo laba kormeere ku-xigeen oo xilkoodu yahay hab maamuska, ilaalinta nabadgalyada iyo habsami u socoshada hawlaha Golaha.

2) Kormeeraha iyo kormeere ku-xigeennada ku xusan lambarka 1aad ee qodobkan waxaa dooranaya guddiga Joogtada ah, wuxuuna ka dhex dooranayaa xubnihiisa.

## *XUBINTA III*

## *(GUDDIYADA GOLAHA SHACBIGA)*

### *QODOBKA 8AAD*

### *(DHISMAHA GUDDIYADA GOLAHA)*

1) Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa Guddiyo ka koo-ban Xildhibaanno ka tirsan Golaha oo ay Guddoomi-yeyaal ka noqonayaan Xubno Guddiga Joogtada ah.

2) Guddiyadu waxay xilka haynayaan muddada Golaha oo dhan, waana kuwa hoos ku qoran :-

1) Guddiga Siyaasadda;

2) Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada;

3) Guddiga Arrimaha Bulshada;

4) Guddiga Shuruucda;

5) Guddiga Difaaca iyo Nabadgalyada

3) Golaha Shacbiga wuxuu xubnihiisa ka dhex magacaa-bi karaa, haddii loo baahdo, Guddiyo aan joogta ahayn oo qabanaya xilal gaar ah, muddo xaddidan gudaheed.

### *QODOBKA 9AAD*

### *KA BAARAANDEGIDDA HORDHACA AH*

1) Mashruuc sharci kasta waxaa loo gudbinayaa ka baa-raandegidda Guddiga awoodda u leh.

2) Mashruucyada sharci ee dhan ka sameeya dakhli ama kharaj waxaa isla markaa loo gudbinayaa Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyadda.

3) Codsiyada la xiriira xil ka fariisad, xil ka qaadid ama denbi ku qaadid Xildhibaan, waxaa ka baaraandegaya Guddiga Shuruucda oo taladiisa u gudbinaya Guddiga Joogtada ah.

4) Ka baaraandegidda miisaaniyadda sannadka iyo xisaabxirka waxay ka mid yihiin awoodda gaarka ah ee Guddiga Dhaqaalaha iyo Maaliyada oo ay kaabayaan min hal xubin oo ka wakiil ah Guddiyada kale.

### *QODOBKA 10AAD*

### *(SHIRDUMIDDA GUDDIYADA GOLAHA)*

1) Guddiyada waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaashooda, iyagoo u maraya guddoonka Golaha Shacbiga.

2) Guddoomiyaasha Guddiyada waxay kulan kasta kaddib gaarsiinayaan Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Magacyada Xubnaha Maqnaada.

### *QODOBKA 11AAD*

### *(CADDEYN BIXINTA SARAAKIISHA MAAMULKA*

Guddiyadu waxay awood u leeyihiin iney u yeertaan Saraakiisha Maamulka si ay u weydiiyaan caddaym la xiriirta arrinta laga hadlayo.

### *QODOBKA 12AAD*

### *MAGACAABID WARBIXIYE*

Gudoomiye Guddi kasta marka la soo gaarsiiyo mashruuc sharci, wuxuu xubnaha Guddiga ka dhex magacaabaya qof warbixin ka soo sameeyo.

Haddii mashruuc sharci uu dhan ka saameeyo arrimo la lagu kordhiyaa wakiil ka socda Guddiga Dhaqaalaha iyo Maalixiriira maaliyada, waa in guddiga ka baaraandegaya arrinta yadda.

*QODOBKA 13AAD*

*(BANDHIGIDDA MASHRUUCA SHARCI)*

1) Guddi kasta wuxuu gudigga joogtada ah u gudbinayaa Mashruuca sharci ee uu ka soo baaraandegay.

2) Guddiga Joogtada ah wuxuu mashruuca sharci ee ku tilmaamān lambarka 1aad ee qodobkan u bandhigayaa Golaha Shacbiga, iyadoo warbixinta uu jeedinayo xubin ka mid ah Guddigi ka soo baaraandegay.

*XUBINTA IV*

*(GUDDIYADA BAARISTA)*

*QODOBKA 14AAD*

*(MAGACAABIDDA GUDDI BAARIS)*

1) Golaha Shacbigu wuxuu magacaabi karaa Guddi Baaris oo ka kooban xubno ka mid ah Xildhibaannada Golaha.

2) Magacaabidda Guddiga ku qoran lambarka 1aad ee qodobkan waxaa soo jeedin kara Guddiga Joogtada ah, waxaana Goluhu ka doodi karaa haddii ay isku raacaan saddex meelood meel Xildhibaannadiisa.

3) Dhismaha Guddi Baaris, Goluhu wuxuu ku doonayaa cod hal dheeri ah.

4) Goluhu wuxuu magaabidda Xubnaha Guddiga Baarista u wakiilan karaa Guddiga Joogtada ah.

*QODOBKA 15AAD*

*(AWOODDA GUDDIGA BAARISTA)*

Guddiga Baaristu, marka uu xilkiisa gudanayo, wuxuu leeyahay awood la mid ah tan Hay'adaha Garsoorka, wuxuuna natiijada baaristiisa u soo gudbinayaa Guddiga Joogtada ah.

QODOBKA 16AAD

(HAWL FULINTA XARUNTA KA BAXSAN)

Marka Guddiga Baarista ay la noqoto inuu hawshiisa ka fuliyo ama u diro xubno ka mid ah Guddiga meel ka baxsan Xarunta Golaha Shacbiga, waa inuu ogeysiiyaa Guddoomiyaha Golaha, isla markaana ka helaa oggolaansho.

XUBINTA V

(XIL KA FARIISIN)

QODOBKA 17AAD

(XIL KA FARIISASHO)

1) Xil ka fadhiisashada Xildhibaanka waxaa cod hal dheeri ah ku guddoominaya Golaha Shacbiga.

2) Codsiga xil ka fariishada xildhibaanku wuxuu ku soo soo gudbinayaa qoraal sababeysan.

QODOBKA 18AAD

XIL KA QAADIDDA XILDHIBAANKA

1) Xildhibaan kasta ee oofin waaya shuruudaha xildhibaanimada ama ka soo bixi waaya waajibaadka xilkiisa la ririira, waxaa laga qaadayaa xilka.

2) Codsiga xil ka qaadidda waxaa soo jeedin kara, Doortayaasha ka sokow, siduu qabo qod. 74/2 ee Dastuurka, afar meelood meel Xildhibaannada, waxaana cod hal dheeri ah ku guddoominaya Golaha Shacbiga.

XUBINTA VI

FADHIYADA, DOODAHA, NABADGELYADA QOLKA SHIRKA IYO TIRIBUUNKA

QODOBKA 19AAD

(MUDDADA KALFADHIYADA)

Kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Golaha Shacbigu waxay soconayaan ilaa ay ka dhammaanayaan hawlaha ku qoran ajendaha.

## QODOBKA 20AAD

## (SHIRARKA GOLAHA)

Shirarka Golaha Shacbiga waxaa fura,xirana Shirguddoo-miyaha, isaga ayaana ku dhawaaqayaa waqtiga iyo ajandaha shirka dambe.

## QODOBKA 21AAD

## (HADALQORKA FADHIYADA)

1) Xoghayaha Goluhu wuxuu fadhi kasta ka diyaarina-yaa hadalqor lagu muujinayo magacyada Xildhibaan-nada ka soo qeyb galay fadhiga, arrimaha laga dooday iyo go'aannada laga gaaray.

2- Hadalqorka fadhi kasta waa inuu saxiixaa Guddoomi-yaha iyo Xoghayaha Golaha.

## QODOBKA 22AAD

## OGGOLAANSHAHA HADALQORKA)

1) Fadhi kasta wuxuu ku bilaabmayaa akhrinta hadalqor-ka fadhigii ka horreeyey, haddii uu si ka duwan Go-luhu isku raacin.

2) Hadalqorka marka la akhriyo, haddaan cidna wax ka oran, waxaa loo qaadanayaa in la oggolaaday.

3) Shirgudoomiyuhu wuxuu hadalka u oggolaan karaa Xildhibaanka doonaya inuu saxo ama caddeeyo hadal ama ra'yi uu hory u soo jeediyey kuna yaal hadlqorka la akhriyey.

## QODOBKA 23AAD

## (AKHRINTA QORAALADA)

1) Shirgudoomiyuhu, ama haddii uu foro, Xoghayuhu wuxuu Golaha u Akhrinayaa dhambaallada iyo qoraal-lada soo gaara ee khuseeya Golaha.

2) Looma akhrinayo Golaha, qoraallada aan la aqoon cid-da soo dirtay ama aan habbooneyn.

## QODOBKA 24AAD

## (TIRADA SHARCIGA)

1) Hubinta tirada sharciga ah ee fadhiga Golaha, waxaa leh Shir Guddoomiyaha.

2) Xisaabta tirada sharciga ah ee fadhiga Golaha, waxa leh :

3) Xildhibaannada ka soo qeyb galay fadhiga haddii ay tiradoodu ka yar tahay kala bar iyo hal Xildhibaannada Golaha, marka laga reebo kuwa ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan, waxaa fadhiga dib loo dhigayaa hal saac, haddii halkaas saac kaddib aan la helin tirada sharciga ah, waxaa fadhigaas loo ridayaa maalinta ku xigta ee aan fasax ahayn, isla saacadii maalintii hore, haddii Shirguddoomiyuhu si ka duwan uusan go'aamin.

4) Haddii inta fadhigu socdo loo baahdo in la hubiyo tirada sharciga ah ee Xildhibaannada si cod loo qaado, Xildhibaanka maqnaada fasax la'aan wuxuu la mid yahay qof fadhigaas oo dhan aan ka soo qeyb galin.

## QODOBKA 25AAD

## (HADAL QADASHO)

